



Miisaaniyadda Muwaadinka 2024

DOWLAAD GOBOLEEDKA HIRSHABELLE



Miisaaniyadda Dowladda 2024



Dowlad Goboleedka Hirshabelle waxay sanad walbo soo saartaa miisaaniyadda muwaadiniinta si ay dadka ugu fududeeyso in xog fiicaan ka helaan miisaaniyadda dowladda. Waaxda Miisaaniyadda iyo Waaxda Dhaqaalah ee Wasaaradda Maaliyadda ayaa iska kaashada diyaarinta miisaaniyadda dadweynaha ujeedkana waa in dadka loo soo gudbiyo xog la xiriirta qaybaha ay ka kooban tahay miisaaniyadda dowladda sida ku-talo galka odoroska dakhliga iyo kharashaadka dowladda oo faahfaahsan. Qorshaha Horumarinta Dowladda oo buddhig u ah Miisaaniyadda Dowladda ayaa hagaya siyaasadaha Dowladda Hirshabelle iyadoo ujeedku yahay in sare loo qaado dakhliga dadka ku nool deegaanada Hirshabelle.

Waa maxay Miisaaniyadda Dowlad Goboleedka Hirshabelle?

Miisaaniyadda Dowladda waa dukumeenti ay ku jiraan odoroska dakhliga iyo kharashaadka dowladeed ee sanadka soo socda waxa uuna ku salaysan yahay mudnaanta horumarineed ay Dowladdu leedahay. Wasaaradda Maaliyadda waxa ay aqoon-is-weydaarsi usoo agaasintaa qaybaha dowladda si ay uga doodaan mudnaanta qaranka iyo odoroska maaliyadeed ee sanadka soo socda. Wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee Dowladda waxa ay usoo gubdiyaan Wasaaradda Maaliyadda soo-jeedinta miisaaniyadooda kadib marka loo qaybiyo ku-talo-galka maaliyadeed ee hay'ad walbo waxaana miisaaniyadahaas la isugu geeya hal dukumeenti oo ah miisaaniyadda soojeedinta taas oo loo gudbiyo Golaha Wasiirada Hirshabelle. Golaha Wasiirada ayaa dib-u-eegis ku sameeya ansixiyana miisaaniyadda soojeedinta Dowladda. Kadib Golaha Baarlamaanka ayaa loo gudbiyaa miisaaniyadda soojeedinta si ay uga doodaan una ansixiyaan. Miisaaniyadda uu Baarlamaanka ansixiyay waxaa loo gudbiyaa Madaxweynaha si uu saxiixo una soo saaro sharciga miisaaniyadda dowladda ee sanadka soo socda.

Qaybaha ugu muhiimsan ee loo qoondeeyay Miisaaniyadda 2024

Maalgalinta dadka

Dowladda waxa ka go'an xoojinta adeegyada bulshada.

Waxbarashada: Lacag gaareysa \$3.5 milyan ayaa loo qoondeeyay Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare. \$2.3 milyan wax loo qoondeeyay Mashruuca Horumarinta Waxbarashada. Mashruucaan ayaa ujeedkiisu tahay in kor loo qaado waxbarashada muwaadiniinta Dowlad Goboleedka.

Caafimaadka: Lacag gaareysa \$1.6 milyan oo 8% wadarta miisaaniyadda ayaa loo qoondeeyay Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada. Lacag gaareysa \$480,000 ayaa loogu tala-galay bixinta adeeg caafimaad. Lacag gaareysa \$307,200 ayaa loo qoondeeyay Mashruuca DAMAL CAAFIMAAD sidoo kale lacag gaareysa \$280,671 ayaa loogu talo-galay xoojinta nidaamka caafimaadka.

Maalgelinta Kaabayaasha iyo Horumarinta Dhaqaalaha


- ❖ Miisaaniyadda Dowladda ee 2024 waxay maalgelinaya dib-u-dayactirka iyo dhismaha kaabayaasha dhaqaalaha sida garoomada diyaaradaha, wadooyinka, biyo-xireenada iyo nidaamka waraabka.
- ❖ Miisaaniyadda Dowladda ee 2024 sido kale wax ay fulineysa mashaariic loogu talo-galay wax ka qabashada fataahadaha kusoo noqnoqday gobolada Hiiraan iyo Shabeelaha Dhexe ee Dowlad Hirshabelle.
- ❖ Lacag gaareysa \$1.9 milyan ayaa loo qoondeeyay Wasaaradda Biyaha si ay u fuliso mashaariic u suurta-gelinaya muwaadinka inuu helo biyo nadiif ah.
- ❖ Lacag gaareysa \$703,128 ayaa loo qoondeeyay Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka si ay beeraleyda u siiso agabka beerashada sida abuurka, bacrimiye iyo qalabka kale ee beeraha.
- ❖ Lacag gaareysa \$348,529 ayaa loo qoondeeyay Wasaarada Xanaanada Xoolaha: Ujeedka waa in kor loo qaado nolosha xolo dhaqatada lagana kaalmeeyo saameynta is-badalka cimilida ku leeyahay wax-soo-saarkooda.

Xoojinta Tayada Hay'ada Dowladda


- ❖ Lacag gaareysa \$74,040 ayaa loo qoondeeyay Wasaaradda Garsoorka si maxkamado looga dhiso deegaanada dhawaan la xureeyay ee Gobolada Hiiraan iyo Shabeelaha Dhexe.
- ❖ Lacag gaareysa \$1.25 milyan ayaa loo qoondeeyay Wasaaradda Amniga si loo soo celiyo sharciga iyo kala danbeynta deeganada dhawaan la xureeyay.
- ❖ Miisaaniyadda 2024 wax ay lacag gaareysa \$3.97 milyan u qoondeysay Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Dowladaha Hoose si loo dhammeystiro dhismaha golaha deegaanka loona qabto doorashooyinka golaha deegaanka.

Qaab-dhismeedka Siyaasadaha Dhaqaalaha Miisaaniyadda

Wuxuu odoroska muujinayaa in qorshaha soo kabashada mudada dhow ay tahay mid wanaagsan iyadoo ay jiraan khataro badan. Waxaa la saadaalinayaa in sanadka 2024 kobaca dhaqaalaha uu gaaro 3.5% halka sanadka 2025 la saadaalinayo inuu gaaro 3.8% taas oo ka badan koboca dadka oo ah 2.8%. Dib-u-habaynta dhaqaalaha iyo kalsoonida maalgashadayaasha deyn cafinta kadib waxaa la filayaa in ay soo jiidato maalgashiga shisheeye sare na u qaado dhaqdhaqaaqa ganacsiga gaarka loo leeyahay taas oo kordhineysa awooda wax-soo-saarka gudaha. Soo kabashada beeraha dalka iyo sicirka badeecooyinka dunida ayaa saameyn ku leh odoroska kobaca dhaqaalaha. Si kastaba ha ahaatee, khataro badan oo ka mid ah is-badalika cimilida dunida, amni darada iyo jahwareerka ka jira dhaqaalaha adduunka ayaa ku gadaaman ifafaalaha wanaagsan ee dhaqaalaha. Waxaa la saadaalinayaa in inta u dhixeyesa 2023 iyo 2025 uu heerka faqriga sii ahaado 73%. Si loo dardargeliyo dadaalada yareynta faqriga waa in dowladda la timaado siyaasado iyo maalgashi kor u qaada tayada wax-soo-saarka, xoojiyana adkeysiga bulsho shaqo abuurna sameeynaya sidoo kale na ballaarinaya barnaamiyada danyarta u roon gaar ahaan dumarka iyo dhalinyarada.




Dowladda Hirshabelle ayaa inta badan la kulma masiibooyinka dabiica ah sida daedad soo noqnoqda oo ay sabab u tahay roobka El-Nino ee dhawaanahaan ka da'ay deegaanada inta lagu jiray sanadka 2023. Dowlad Goboleedka ayaa sidoo kale la filayaa inuu wajaho abaaro iyo roobabka la'aan sanadka 2024.




Dakhliga

Dakhliga gudaha ayaa la filayaa inuu 35% ka noqdo wadarta guud ee dakhliga dowladda halka deeqaha dibadana 64% ay noqoneyso. Wadarta dakhliga gudaha ayaa la saadaalinaya inuu sanadka 2024 gaaro \$7 milyan oo ah hoos u dhac ka badan 50% taas oo ku timid dadaalada dowladda ee lagu kordhinayo kalsoonida miisaaniyadda. Dhakhliga canshuuraha oo lagu qiyaasayo \$6,791,220 ayaa ah kan ugu badan ee dakhliga gudaha. Dakhliga canshuuraha ayaa la saadaalinaya inuu kordho sanadkaan marka la barbardhigo sanadkii hore taasoo ay ugu wacan tahay canshuurta dakhliga ee la kordheysa dakhliga qofka ee dhawaan la meelmariyay.

Own source vs Grants




Major Taxes



Kharashaadka

Wadarta karashka ku baxaya miisaaniyadda 2024 waa \$20,013,663 milyan (oo ay ku jiraan maalgelinta deeq bixiyaasha). Sida shaxda hoose muujinayso waxaa kharashaadka dowladda loo qorsheeyay amniga, horumarinta waxbarashada iyo adeegyada caafimaadka iyo maalgelinta kaabayaasha dhaqaalaha ee muhiimka u ah dowladda.

Total Expenditure



Key Sector Allocations

